FAAFINTA الرسمية RASMIGA الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 13-aad. Garowe 06 December, 2011** **Lam.12**

جريدة الشهرية

**Faafinta bil walba soo baxda**

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Wax ka bedelka Xeerka Arsgagixisada**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr10. ee 06/12/2011, kuna saabsan wax ka bedelka Xeerka Argagixisada***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

Madaxweynaha Dawladda Puntland

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr.10 ee December 06, 2011, kuna saabsan wax ka bedelka Xeerka Argagixisada Puntland**

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad; |
| Markuu arkay: | Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/115/2011 ee 03/11/2011; |
| Markuu tixgeliyey: | Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland. |

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen wax ka bedelka Xeerka Argagixisada Puntland..

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILLADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES**

**Xafiiska Guddoomiyaha** | **Office of the Speaker**

---

***Ref:*- <u>XGGW/DPL/115/2011</u>** **Garoowe, Khamiis** **Date:- <u>03/11/2011</u>**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo:- <u>Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Argagixisada</u>**

**<u>Qodobkiisa 11-aad</u>**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-**

**MARKUU ARKAY;-** **Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad.**

**MARKUU ARKAY:-** **Soo gudbinta Madaxweynaha MW/DPS/972/2011 ee 25 August, 2011 kuna saabsan Wax ka bedelka Xeerka argagixisada.**

**MARKUU TIXGELIYEYEY:-** **Baahida loo qabo ku dhegaysiga Maragga meel ka baxsan maxkamadda.**

**MARKUU DHEGAYSTAY:-** **Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.**

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

1. Dhegaysiga dacwadaha dembiyada qaarkood waxaa qaadi kara maxkamadaha awoodda u leh ee Dastuurku u jideeyey.
2. (B) Waxaa dembiyada qaarkood dhegaysigooda garsooruhu ku dhegaysan karaa maragga meel ka baxsan maxkamadda.

   (T) waa in qareen Goob-jooge uga ahaado eedaysanaha goobta markhaatiga lagu dhegaysanayo.

***Allaa Mahad Leh***

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

# Xeerka La-Dagaallanka Argagixisada

## Qodobka 1-aad
## Macnayn

1. Argagixisanimadu, waa falal dembiyoodyo ku salaysan kuna wajahan abuurid shaqaaqo loola jeedo argagixin iyo dilal dad, oo leh ujeeddo siyaasadeed ama fikri si ay u gaaraan hadaf ay higsanayaan oo ku salaysan abuurid xasilloonidarro iyo burburin nidaam dawladnimo.

2. Fal-argagixiso waxaa loola jeedaa falalka argagixisadu sameyso inta u dhaxaysa hindisaha hawl-gallada ilaa fulinta fal-damaabiyeedka Argagixisanimo.

3. Astaamo argagixiso waa calaamadaha iyo qaabka dad ahaan loogu falgalo iyo qalab ahaan waxa loo adeegsado.

4. Raad argagixiso waa muqaal xaambaarsan burbur iyo baaba'a argagax leh.

## Qodobka 2-aad
## Aqoonsi Fal-dambiyeed Argagixiso

Waxaa loo aqoonsanayaa fal-dambiyeedyo argagixiso dhammaan ama qayb ka mid ah falalka hoos ku qeexan oo ah fal-dembiyeedyo lid ku ah jiritaanka Dawladda Puntland iyo Qaranka Soomaaliyeed:-

1. Aasaasidda, abaabulka, jihaynta, hoggaaminta, tababaridda, maalgelinta, qalabaynta, qalab-samaynta, xiriirinta, fulinta iyo ka-qayb-qaadashada, markay ku caddaato, waxaa lagu xumayaa dil toogasho ah iyo hantidii ay faldembiyeedka ay ku galeen ama ka soo gashay oo Dawladdu kala wareegto.
2. Dhiirrigelinta, qarinta, gacansiinta iyo falal kasta oo lagu taageerayo argagixisada, markay ku caddaato, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano ilaa xabsi daa'im iyo hantidii ay faldembiyeedka ay ku galeen ama ka soo gashay oo Dawladdu kala wareegto.

## Qodobka 3-aad
## Argagixisada Caalamiga ah

1. Argagixisada ajnebiga ah ee u soo duulay burburinta Dawladda Puntland iyo Qaranka Soomaaliyeed waxaa loo aqoonsanayaa argagixiso caalami ah

waxaana lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo qalab ama agab kale wixii laga helo oo ay Dawladdu kala wareegto.

2. Waxaa isla ciqaabta ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkan mutaysanaya qof kasta oo Soomaali ah oo loo aqoonsado inuu yahay aragixiye caalami ah.

**Qodoka 4-aad**
**Mamnuucid**

Waxaa la mamnuucay dhismo kooxo/ururro ujeedooyin argagaxisanimo leh, cid kasta ay ku cadaato waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan qodobka 2-aad ee xeerkan, faqradihiisa 1-aad iyo 2-aad, kolba tii ku habboon.

**Qodobka 5-aad**
**Hay'adaha Amniga**

Hay'adaha amniga ku shaqada lihi waxay awood buuxda u leeyihiin:

1. La-dagaalanka, qabashada, baaridda, ka-hortagga cid kasta oo ku hawlan falal-
argagaxisanimo iyo gacan-ku-haynta hantidooda faldembiyeedka loo adeegsaday.

2. Dilka waxaa lagu fulin karaa go'aan maxkamadeed oo kama
dambays ah sida uu qabo Dastuurka DPL Qodobka 18-aad farqada 1-aad )

3. Cid kasta oo lagu eedeeyo fal dembiyeed argagixisnimo waxaa la horgeynayaa maxkamada awooda u leh.

4. Baarista iyo daba-galka falalka-argagaxisanimo waxaa u xil saaran hay'adaha amniga ee Puntland iyo cid kasta oo ay la kaashan karaan.

**Qodobka 6-aad**
**Ciqaabta**

1. Qof kastoo ay ku caddaato aasaasidda, hoggaaminta, maalgalinta, jihaynta, tababaridda, qalabaynta ama qalab-samaynta, fulinta, ka-qaybgalka iyo xiriirinta falalka iyo ururrada argagixisada ah waxaa lagu qaadayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 2-aad faqraddiiisa 1-aad.

2. Qof kastoo ay ku caddaato dhiirigelinta, qarinta, gacansiinta iyo falal kastoo kale oo lagu taageerayo argagixisada waxaa lagu qaadayaa ciqaabaha ku xusan qodobka 2-aad faqraddiiisa 2-aad.

3. Cid kasta oo si ulakac ah u geysata fal sababi kara dhimasho, dhaawac, argagax bulsho iyo burburin hanti sida, qarax, xabad iyo xeelado kale oo wax lagu dilo ama khasaare keeni kara waxaa lagu ciqabayaa, ciqaab u dhiganta fal dembiyeedka uu galay.

**Qodobka 7-aad**
**Isku day ismiidaamin**

Cid kasta oo isku dayda fal ismiidaamineed laguna qabto korkiisa ama gaadiidkiisa aaladaha wax lagu qarxiyo waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah)

**Qodobka 8-aad**
**Duruufaha Ciqaabaha Cusleeya ama Fududeeya**

Duruufaha dambiyada cusleeya ama fududeeya ee xeerkan argagixisada waxaa laga qaadanayaa qaybta guud ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (qodobbadiisa 118, 119 iyo kuwa ku xiga ee la midka ah).

**Qodobka 9-aad**
**Caddaymaha**

Xeerkani wuxuu caddeymo ama marag-muujin u aqoonsanayaa waxyaabaha uu Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed caddeymo u yaqaan oo lagu kordhiyey cajaladaha maqalka, muuqaalka, raadraaca calaamadaha caddaynaya faldembiyeedka (forensic science) iyo wixii kale oo maxkamad faldembiyeed muujin u aragto.

**Qodobka 10-aad**

Qof kasta oo xil qaran haya oo lagu helo inuu la shaqaynayo iyo/ama u fidiya taageero, nooc kasta ha ahaatee, ururrrada argagixisada ayna ku caddaato waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan qodobka 2-aad ee xeerkan faqraddiisa 2-aad iyo inuusan qaban karin shaqo dawladeed.

**Qodobka 11-aad**
**Maxkamadda awoodda u leh**

1. Dhegaysiga dacwadaha dembiyada qaarkood waxaa qaadi kara maxkamadaha awoodda u leh ee Dastuurku u jideeyey.

2. B) Waxaa dembiyada qaarkood dhegaysigooda garsooruhu ku dhegaysan karaa maragga meel ka baxsan maxkamadda.
   T) waa in qareen Goob-jooge uga ahaado eedaysanaha goobta markhaatiga lagu dhegaysanayo.

**Qodobka 12-aad**
**Is-difaacidda Eedeysanaha**

Eedeysanahu isaga ayaa maxkamadda horteeda iska difaacaya, qareenna waa uu qabsan karaa, haddii uu qabsan karinna Dawladda ayaa u qabanaysa.

**Qodobka 13-aad**
**Saamaxaad**

Qof kasta oo ka hara falalka argagaxisada hay'adaha amniguna ay diiwaan geliyaan, wuxuu xaq u yeelanayaa saamaxaad, marka laga reebo kuwa loo aqoonsan yahay in ay mid yihiin argagaxisada caalamiga ah.

**Qodobka 14-aad**
**Dhaqan-galka**

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka Golaha Xukuumadda iyo Golaha Wakiilladu ay ansaxiyaan, Madaxweynaha Puntland uu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**